Svenska kyrkans arbetsgivarorganisation

# Waxyaabaha ku saabsan

DUUGAHA, GUBIDDA MAYDKA IYO XABAALAHA



NOOCYADA QABUURAHA | XABAALIDDA UGU DANBAYSA | XAFLADAHA DUUGTA SHARCIGA DUUGTA, XABAASHA IYO GUBIDDA MAYDKA | KHARASHKA DUUGTA

Waxyaabaha ku saabsan duugaha, gubidda maydka iyo xabaalaha
Ururka Shaqaalaha Kaniisadda Iswiidhan
KOOXDA TAFAFTIRKA Eva Grönwall, Sofia Skog, Eva Årbrandt Johansson
QAABKA Andréas Lindström (september)
DAABACAADDA Ljungbergs, 2020

DAABACAADDII 3AAD

# Waxyaabaha ku saabsan

## DUUGAHA, GUBIDDA MAYDKA IYO XABAALAHA

NOOCYADA QABUURAHA | XABAALIDDA UGU DANBAYSA I XAFLADAHA DUUGTA SHARCIGA DUUGTA, XABAASHA IYO GUBIDDA MAYDKA I KHARASHKA DUUGTA

# TUSMOOYINKA

3 Gogol dhig
4 Sharciga iyo mas`uuliyadda duugaha, mayd gubidda iyo xabaalaha
5 Qofkasta waa in la aasaa ama waa in danbaskiisa la aasaa ama la firdhiyaa
6 Kharashka duugta
7 Waxa kujira kharashka duugta
8 Waxa aan kujirin kharashka duugta
9 Xulashooyinka iyo rabitaanada la xiriira duugaha, mayd gubidda iyo aasitaanada
*Sababaha aad u qorayso rabitaanadaada*
*Xulashada naxashka iyo weelka danbaska*
11 Xafladda duugta
*Adeega duugta ee xubnaha Kaniisadda Iswiidhan*
*Adeegga duugta ee dadka aan xubinta ka ahayn*
*Kaniisadda Iswiidhan*
*Xafladaha duugta ee bulshooyinka caqiidooyinka kale*
*Duugaha bulshada*
14 Qabuuraha
*Qabuuraha khaaska ah*
*Qabuuraha ku yaala goobaha kale*
*Dadka xuquuqda u leh duugta*
*Noocyada qabuuraha*
*Ilaalinta qabuuraha*

Dheeraad ku ah xarunta — Ku socota qofka qabanqaabinaya duugtayda – Rabitaanadayda – buuxi, saar kaydina

18 Mayd gubidda
19 Aasidda naxashka iyo aasidda ama firdhinta danbaska
*Ku firdhinta danbaska dhulka ama biyaha*
21 Korjoogtaynta duugaha, gubidda maydka iyo xabaalaha
*Guddiga maamulka ismaamulka*
*Wakiilada duugta*
23 Liiska qaraabada
25 A–Z Qoraalka iyo tixraacyada bogga

## Gogol dhig

Buugaan macluumaadka waxaa loo diyaariyay qof walba oo qaba su`aalo ku saabsan sida ay u dhacaan duugaha, gubidda maydka iyo xabaalaha gudaha Iswiidhan. Buugga macluumaadku waxa uu sharaxayaa waxyaabaha howlahaasu ay ka kooban yihiin iyo waxyaabaha kamidka ah kharashaadka duugta. Su`aalaha ku saabsan duugta, gubidda maydka iyo xabaalaha caadiyan masoo if baxaan ilaa in qof qaraabo dhow ah uu dhinto maahane. Su`aaluhu waxa ay ku saabsanaan karaan waxa ay qaraabadu samaysan karaan, waxa bulshadu bixinayso iyo waxa hantida marxuumka laga bixinayo. Waa fikir wanaagsan in aad horey usii hesho jawaabaha su`aalahaan iyo sharaxaadda – si aad uga caawiso qaraabadaada – sida aad jeclaan lahayd in arimahaaga duugta la xiriira loo diyaariyo.

Bulshadu waxay meel dhigtay mas`uuliyadda gubidda maydka iyo duugta marxuumku uu ku leeyahay maamulka kaniisadda iyo kooxaha maaulka kaniisadda ee Kaniisadda Iswiidhan iyo dowladda hoose ee Stockhlom iyo Tranås. Mas`uuliyadda Kaniisadda ee arimahaan waxay soo bilowdeen waqti dheer – oo gaaraysa 1000 kahor. Xaaladaha intooda badan waxaa jira qabuuro loogu tala galay dadweynaha oo kuyaala dhulka Kaniisadda. Maamulka kaniisadda waxaa laga doonayaa in ay sameeyaan duugta, mayd gubidda iyo howlaha aasitaanka ayaka oo u samaynaya qaab caqiido ahaan dhexdhexaad ah sida waafaqsan sharciga iyo in ay siiyaan caqiidooyinka iyo aragtiyada nolosha kale qaab xushmad leh. Bulshada dhaqamada kala duwan leh ee Iswiidhan waxaa si isa soo taraysa u muujinaya qabuuraha. Buuggaan macluumaadka ah waxaan ku kala saaraynaa shaqada Kaniisadda ee ah in ay yihiin maamul duugitaan sida lagu sheegay Sharciga Duugta (Begravningslagen), iyo howlaha bulshada caqiidada Kaniisadda Iswiidhan ay siiyaan xubnahooda.

Buuggaan macluumaadku waxa uu raacayaa amarka kaasoo qaraabadu inta badan ku wajahaan xaalado badan kuwaas oo ay tahay in la go`aansado marka qof uu dhinto. Waxa aan rajaynaynaa in buuggaan macluumaadku markasta ahaan doono mid diyaar u ah, in uu noqdo mid dhammaystiraya diyaarna ku noqdo websaytyada maamulka kaniisadaha, marka qof uu raadinayo macluumaadka dhabta ah ee ku saabsan duugaha, mayd gubidda iyo xabaalaha.

Stockholm, Sebteembar 2016
Ururka Shaqaalaha Kaniisadda Iswiidhan

*Eva Grönwall*
*Sofia Skog*
*Eva Årbrandt Johansson*

## Sharciga iyo mas`uuliyadda duugaha, mayd gubidda iyo xabaalaha

Gudaha Iswiidhan howlahaas oo kale waxaa lagu maamulaa sharciga magaciisu yahay Sharciga Duugta (Burial Act) (Begravningslagen – 1990:1144), iyo xeer loo yaqaan Xeerka Duugta (Burial Ordinance) (Begravningsförordningen – 1990:1147). Sharciga Duugtu waxa uu qeexayaa *begravningsverksamhet*, duugta, gubidda maydka iyo howlaha aasitaanka, ayadoo dhammaan talaabooyinku ay si toos ah ugu xiran yihiin maamulidda qabuuraha dadweynaha.[1]

Gudaha Iswiidhan mas`uuliyadda howlahaan waxaa loo xilsaaray maamullada kaniisadaha iyo kooxaha maamula kaniisadaha (kuwaas oo isla shaqeeya) hoos yimaadana Kaniisadda Iswiidhan[2] iyo magaalada Stockholm iyo dowladda hoose ee Tranås.

Qaybta mas`uulka ka ah duugaha, mayd gubidda iyo xabaalaha waxaa loo yaqaan maamulka aasitaanka. Maamulka aasitaanku waxay mas`uul ka yihiin howlahaan ayakoo ka samynaya goob dhul cayiman ah taasoo loo yaqaan degmo maamuleed. Waxaa maamulka magaalada ka jiri kara dhowr maamul oo qaabilsan aasitaanka, degmo maamuleedka maamulka aasitaankuna waxa uu ku ooli karaa dhowr maamul magaalo. Diiwaanka shacabka ayaa go`aaminaya maamulka aasitaanka ay dadku isleeyihiin.

Maamulka aasitaanku waa in ay diyaariyaan tiro qabuuro ah oo ku filan. Maamulka aasitaanku waa in ay sidoo kale siiyaan qabuuro gaar ah dadka aan xubnaha ka ahayn bulshada aaminsan Kiristaannimada. Duugaha, mayd gubidda iyo aasitaanka waxaa sidoo kale ku jira haysashada qofka dhintay si loo kaydiyo iyo si loo arko, samaynta mayd gubidda iyo aasitaanka, iyo siinta dhismooyinka aan lahayn calaamado diimeed si ay u samaystaan xaflada duugitaan. Mas`uuliyadda waxaa kamid ah shaqada shaqaalaha, dhismooyinka, qalabka iyo wax kasta oo kale ee looga baahan yahay shaqada, sidaa si lamid ah diyaarinta, ilaalinta iyo xanaanaynta goobaha dadweynaha ee loogu tala galay qabuuraha. Mas`uuliyadda maamulka aasitaanka kuma jirto ilaalinta qabuuraha gaarka ah ee qofku uu haysto xaquuqda aasitaanka. Si kastaba ha ahaatee, waxyaabo la socosho ah oo ah xaaladaha qabuurahaan ayaa kujirta.

[1] Sharcigu kaliya waxa uu isticmaalayaa erey bixinta aasaaska duugta. Buugaan macluumaadku waxa uu isticmaalayaa ereyada aasaaska duugta, qabuuraha iyo xabaalaha si isku micne ah.

[2] Maamulka duugta ee Kaniisadda

## Qofkasta waa in la aasaa ama waa in danbaskiisa la aasaa ama la firdhiyaa

Waa arin muhiimad bulsho iyo mid gaaraba ah in qofka dhintay la siiyo xabaasha ugu danbaysa. Dhammaan dadka dhita waa in la aasaa ama danbaskooda waa in la aasaa ama la firdhiyaa, maamulka aasitaankana waxaa ku waajib ah in ay qabri siiyaan dhammaan dadka deegaanka ee dhinta kuwaas ka diiwaan gashan diiwaanka shacabka ee deegaan maamuleedka maamulka.

> *Marka la joogo qabuuraha dadweynaha waa in qabri loo diyaariyaa dadka marka dhimanayeen uga diiwwan gashanaa diiwaanka shacabka in ay yihiin dad deegaanka u ah dhismaha maamulka kaniisadda ama dowladda hoose.*
>
> CUTUBKA 2AAD, QAYBTA 3AAD, SADARKA 1AAD, JUMLADA KOOWAAD EE SHARCIGA DUUGTA ISWIIDHAN

Maamulka aasitaanku waa in ay sidoo kale qabri siiyaan canugga aan wali dhalan kaasoo dhinta markuu dhammaysto todobaadka 22aad ee uu caloosha kujira haddii haweenaydu ay ka diiwaan gashan tahay diiwaanka shacabka ee deegaan maamuleedka maamulka aasitaanka. Waxaa taas lamid ah canugga aan wali dhalan kaasoo dhintay kahor inta uusan dhammaysan todobaadka 22aad ee uu uurka ku jiray, haddii haweenaydu ay qabri codsato caddaynta dhimashadana loosoo gudbiyo maamulka aasitaanka. Shuruuc gaar ah ayaa qabanaysa qofka marku uu dhinto kaliya ka diiwaan gashanaa diiwaanka shacabka ee dowladda hoose ama hoos yimaada ciwaanka “deegaan aan la aqoon” “residence unknown”.

Waa mid muhiim ah in jirka qofka dhintay la gubo ama la aaso sida ugu dhaqsaha badan. Waqtiga ugu dheer ee la ogol yahay ee u dhexeeya waqtiga dhimashada iyo gubitaanka ama aasitaanku waa hal bil. Haddii ay jiraan sababo khaas ah, Hay`adda Canshuurta Iswiidhan ayaa balan qaadi kartaa dib u dhigista gubidda ama aasitaanka.

Qaraabada, ama qof kale, ayaa muhiim ka ah qorshaynta iyo qabanqaabinta duugta iyo arimaha la xiriira. Haddii uusan jirin qof awooda ama doonaya in uu mas`uuliyadda qaado, dowladda hoosee ayaa mas`uul ka ah in ay arinkaas samayso taa baddalkeeda. Ayada oo aan loo eegayn qofka qabanqaabinaya duugta, rabitaanka qofka dhintay ee khusaysa gubitaankooda iyo aasitaankooda waa in la raacaa hadday macquul tahay. Haddii hantida uu qofka dhintay ka tagay aysan lahayn hanti dhaqaale ah, duugta iyo gubidda iyo/ama aasitaanka waxaa lagu qabanqaabinayaa ayadoo taageero dhaqaale laga helayo dowladda hoose. Caddadka kaalmadaan waa ay ku kala duwan tahay Iswiidhan oo dhan. Xafiiska adeegga bulshada ee dowladda hoose ee ku yaalla goobta markii ugu danbaysay qofka dhintay looga diiwaan galiyay diiwaanka shacabka ayaa bixin kara macluumaad ku saabsan waxa khuseeya dowladdaas hoose.

## Kharashka duugta

Qof kasta oo ka diiwaan gashan diiwaanka shacabka ee Iswiidhan bixiyana canshuurta dakhliga ee dowladda hoose waxa uu bixinayaa kharashka duugta. Ilaa 2017, tani waxay khusaysaa Iswiidhan dhammaanteed, marka laga reebo magaalada Stokholm iyo dowladda hoose ee Tranås. Kharasjhka duugta waxaa loogu tala galay in lagu daboolo waxa sharcigu ku fasiro kharashaadka lagama maarmaanka ah ee la xiriira siinta qofka dhintay xabaasha ugu danbaysa.

Kharashka duugtu waa mid sharci ah, taasoo la micno ah in lagu sheegay caddaynta canshuurta ee canshuur bixiyaha. Kharashka waxaa lagu xisaabinayaa ayadoo lagu salaynayo dakhliga canshuurta dowladda hoose ee qofkasta uu bixiyo. Baaxadda kharashka waxaa lagu muujinayaa warbixinta kama danbaysta ah ee canshuurta sanadlaha ah ee qof kastaa bixiyo (*slutskattebesked*).

Kahor inta aysan bilaaban miisaaniyadda sanad kasta, golaha deegaanada Stockholm iyo Tranås ayaa go`aan sanaya baaxadda kharashka duugta ay tahay in dadka degen magaalooyinkaan ay bixiyaan. Ayadoo gacan laga helayo soo jeedinada maamulada duugta ee Kaniisadda, maamul dowladeed oo loogu yeero Kammarkollegiet ayaa diyaarinaya kharashka duugta laga rabo in ay bixiyaan Iswiidhan inta kale. Cabbirka kharashku waa mid isku mid ah qofkasta, ayada oo aan loo eegayn in uu xubin ka yahay Kaniisadda Iswiidhan iyo in kale.

*Kharashka duugta waxaa laga rabaa in ay bixiyaan maamulka aaska ee gudaha Kaniisadda Iswiidhan, ama, haddii qof lagu waajibiyay in uu bixiyo kharashka uu ka diiwaan gashan yahay diiwaanka shacabka magaalada maamulka aaska, magaaladaas.*

CUTUBKA 9AAD, QAYBTA 2AAD, SADARKA 1AAD EE SHARCIGA DUUGTA EE ISWIIDHAN

## Waxa kujira kharashka duugta

Dhammaan dadka ka diiwaan gashan diiwaanka shacabka ee Iswiidhan waxa ay xaq u leeyihiin adeegyada ku qoran Sharciga Duugta. Waxaa sidoo kale ssurto gal ah in aad adeegaan si bilaash ah uga hesho maamulo duugeed oo kala duwan, haddii aaska ama firdhinta danbasku ay ka dhacdo deegaano maamuleedyo ka duwan kan qofka dhintay uu ka diiwaan kaga gashan yahay diiwaanka shacabka. Eeg aybta ciwaankeedu yahay *Qabuuraha ku yaala goobaha kale*.

*Dadka ka diiwaan gashan diiwaanka shacabka ee kujira deegaan maamuleedka maamulka duugta marka uu qofku dhimanayo, maamulka duugtu waa in ay bixiyaan waxyaabaha soo socda ayada oo aan wax kharash ah laga jarayn hantida qofka dhintay:*

- *qabri ama wax u dhigma oo ku yaala qabuuraha dadweynaha muddo 25 sano ah,*
- *duug, ay kamid tahay furidda qabriga, buuxinta gadaale (buuxinta) iyo dhigidda qabriga furan si habaysan,*
- *gaadiidka laga bilaabo marka maamulka duugtu ay la wareegaan mas`uuliyadda qofka dhintay ilaa aaska ama kala firdhinta danbasku uu ka dhacayo, marka laga reebo gaadiidka duugta ama kala firdhinta danbaska meel ka baxsan deegaan maamuleedka maamulka duugta, in gaadiidka loo isticmaalayo heshiis ku saabsan shaqada qabuuro khaas ah maahane,*
- *Mayd gubidda,*
- *dhismeyaalka lagu kaydiyo laguna soo arko qofka dhintay, iyo*
- *dhismeyaalka loogu tala galay xafladda duugta kuwaasoo aan lahayn calaamadaha diimaha.*

CUTUBKA 9AAD, QAYBTA 6AAD EE SHARCIGA DUUGTA EE ISWIIDHAN

Intaa waxaa dheer, kharashka duugta waxaa lagu maal galinayaa dhammaan talaabooyinka kala duwan ee sida tooska ah ugu xiran maamulidda qabuuraha dadweynaha, sida maamulidda la xiriirta, samaynta qabuuro cusub, ilaalinta goobaha dadweynaha ee qabuuraha iyo ilaalinta iyo daryeelka qabuuraha leh qiime taariikh oo gooni ah. Shaqada wakiilada duugta sidoo kale waxaa laga maalgalinayaa kharashka duugta; eeg qaybta ciwaankeedu yahay *La socosho (Supervision)*.

## Waxa *aan* kujirin kharashka duugta

Marka lagu daro adeegyada lagu maal galiyo ayada oo la isticmaalayo kharashka duugta, xaaladaha intooda badan waxaa jira tiro kharashaad ah kuwaas oo ay tahay in qaraabadu go`aan sadaan. Kharashkan ma *daboolayo* kharashka duugtu waana mid ku kala duwan hadba xaaladdu sida ay tahay. Hantida ama qaraabada qofka dhintay ayaa laga rabaa in laga bixiyo:

- Naxashka iyo diyaarinta iyo karfan u xiridda qofka dhintay
- Qaadidda qofka dhintay oo kujira naxashka ayada oo laga qaadayo guriga/isbitaalka lana gaynayo xabaasha dhismeyaalka maamulka ee loogu tala galay in lagu kaydiyo laguna soo arko qofka dhintay, iyo
- Wargalinta dhimashada
- Sharaxaadda naxashka
- Xafladda duugta waxaa kujira maamulaha duugta ama mas`uulka duugta. Qofka dhintay Qofka xubin ka ahaa Kaniisadda Iswiidhan waxa uu xaq u leeyahay adeeg duug ah ayada oo aan wax khidmad ah laga doonayn hantida qofka dhintay.
- Soo dhawaynta duugta
- Weelka danbaska
- Samaynta, rakibaadda iyo ilaalinta dhagaxaanta qabuuraha ama qabriga kale ee xiran Xusuusaha
- Si aad u aragto tafaasiisha sida qabuuraha loo daryeelo, eeg qaybta ciwaanka looga dhigay *Ilaalinta qabuuraha (Maintenance of graves)*.

## Xulashooyinka iyo rabitaanada la xiriira duugaha, mayd gubidda iyo aasitaanada

Marka qof uu geeriyeedo waxaa muhiim ah in qaraabada, ama dadka kale ee qabanqaabinaya duugta, ay raacaan dardaaranka qofka dhinta ee khuseeya mayd gubidda iyo aaska sida ugu dhow ee ugu macquulsan. Dardaaran-nadaan waxa ay khusayn karaan nooca qabriga iyo goobta xabaasha ugu danbaysa.

> *Marka qof uu dhinto, dardaaran kiisa ama dardaaran keeda ku saabsan gubidda iyo aaska waa in qaraabadu u raacaan sida ugu dhow ee ugu macquulsan, saaxiibada dhow ama shakhsiyaadka kale ee qaban qaabinaya arimahaan.*
>
> CUTUBKA 5AAD, QAYBTA 1AAD EE SHARCIGA DUUGTA EE ISWIIDHAN

### SABABAHA AAD U QORAYSO RABITAANADAADA

Sharciga Duugta iyo sharci kale midkoodna ma sheegayo in dadku ay qortaan dardaaran kooda ku saabsan duugtooda, laakiin waxaa jira sababo waaweyn oo arintaas loo samaynayo.

Dadku waxay si xor ah u diyaarsan karaan dardaaran kooda, ama waxa ay isticmaali karaan qoraalka ciwaankiisu yahay*Mina önskemål*, Dardaaran kayga.[3] Shayga muhiimka ah ayaa ah in qaraabada nool la ogaysiiyo dardaaranka qofka dhinta ee khuseeya duugtiisa ama duug teeda. Dukumiintiga sheegaya daradaan-nadaan waxaa la dhigi karaa xafiiska garyaqaanka, santuukh wax lagu rito oo amaan ah kaydka ama ome, tusaale ahaan.

Dukumiintigu waxa uu ka koobnaan karaa tafaasiisha soo socota iyo dardaaran-nada ku saabsan qofka duugtiisa:

- Goobta iyo xabaasha
- Mayd gubidda ama aaska naxashka
- Nooca qabriga, sida baar xasuus ah, (*minneslund* or *askgravlund*), qabri loogu tala galay haraadiga maydka la gubay (*askgravplats*), qabriga qoyska ee jira, qabriga naxashka ama qabriga weelka danbaska; eeg qaybta ciwaankeedu yahay *Noocyada qabuuraha (Types of graves)*.
- Ku firdhinta danbaska dhulka ama biyaha
- Xulashada naxashka iyo weelka danbaska
- Xulashada sida loo diyaarinayo qofka dhintay kahor inta aan naxashka la galin iyo xulashooyinka kafan u xiridda iyo go`a naxashka
- Xafladda duugta/macsalaamaynta
- Soo dhawaynta duugta

---

[3] *Mina önskemål* (Dardaanakayga) waxaa laga soo dajinkaraa www.svenskakyrkan.se/begravning.

Qaraabada qaarkood waxa ay isku khilaafaan sida loo dhigayo xabaasha iyo meesha laga dhigayo xabaasha qofka dhintay. Ma waxa uu noqonayaa aas naxash mise gubid? Aasku ma waxa uu noqon doonaa qabri qoys oo horey u jiray, dabcan oo gooba kala duwan ah, ama qabri cusub oo ku yaalla xaafadda, magaalada ama caasimadda uu qofka dhintay ku noolaa? Aaska ama gubidda qofka dhintay ee ka horeysa inta qaraabadu aysan murankooda ka heshiin lama ogola. Xaaladaha qaarkood, qofka dhintay waxaa lagu kaydiyaa goob talaajad ama qaboojiye ah oo ku taalla meesha maydka lagu kaydiyo.

Haddii khilaafku uu ku salaysan yahay su`aal ku saabsan aaska ama gubidda ama goobta xabaasha, qaybahaas waa in la siiyaa codsi dhexdhexaadin. Maamulka aaska ee goobta markii ugu danbaysay uu qofka dhintay kaga diiwaan gashanaa diiwaanka shacabka ayaa noqonaya dhexdhexaadiye. Haddii qaybuhu aysan heshiin karin inta lagu jiro hanaanka dhexdhexaadinta, guddiga maamulka ismaamulka ayaa arinta la wareegaya ayaga ayaana xukumaya midka/kan go`aanka ka gaaraya muranka. Hanaanka wax ka qabashada muranadaas oo kale waxa ay qaadan kartaa waqti. Hal qaab oo wanaagsan oo looga hortago muranka ayaa ah in dadku ay qoraan dardaaran kooda ayana ku wargaliyaan qaraabadooda ku dhow.

## XULASHADA NAXASHKA IYO WEELKA DANBASKA

Marka la tixraaco Sharciga Duugta, qofka dhintay uma baahna in la galiyo naxash, laakiin sababaha caafimaadka iyo badqabka shaqaalaha maamulka aaska dartood, naxash ayaa loo isticmaalaa xabaalaha naxashka ah. Waa in had iyo jeer naxash loo isticmaalaa gubidda maydka. Looma baahna weelka danbaska haddii danbaska lagu firdhinayo beerta xasuusta *minneslund*, si toos ah loogu duugo qabriga ayada oo la socota gubidda maydka ama lagu firdhiyo dhulka dushiisa ama biyaha dushooda. Xaaladahaas oo kale, danbaska waxaa lagu qaadayaa boorso khaas ah ama santuukh alwaax ah oo xiran ayadoo laga qaadayo meesha maydka lagu gubay.

Samaynta naxashka ama weelka danbaska iyo riinjiyaynta iyo qurxinta naxashka la soo iibsado ama weelka danbaska waa mid la ogol yahay, laakiin kaliya ayada oo la raacayo shuruuc gaar ah. Maamulka meesh maydka lagu gubo ama qabriga ayaa ku siin kara macluumaad ku saabsan alaabta iyo cabirada la ogol yahay.

Waxaa jira weelasha danbaska oo khaas ah looguna tala galay danbaska caruurta iyo weelka danbaska oo qaadi kara laba xirmo oo danbas ah. Kuwaan sidaa oo kale guriga ayaa lagu samaysan karaa.

## Xafladda duugta

Sharciga Duugtu waxa uu maamulaa aaska iyo gubidda maydka. Si kastaba ha ahaatee, ma maamulo, waxyaabaha kale ee duugta. Qaabka ay qaraabadu u doonayaan in ay xushmaddoodii ugu danbaysay u siiyaan qofka dhintay waa mid guud ahaan arin khaasa ah.

Qaraabadu waxa ay xorriyad balaaran u haystaan in ay sida ay rabaan oo shakhsi ah u samaystaan macsalaamaynta. Waxa ay arintaani ka dhici kartaa kaniisadda, dhisme macbad, hoolka maamulka kaniisadda ama beer, guriga, xeebta, dhinaca qabriga ee qabuuraha ama meelaha kale ee ku haboon. U qaadista naxashka ee xafladaha duugta ee guriga, beer gaar loo leeyahay, xeeb ama waxa lamidka ah caadiyan lagama bixiyo kharashka duugta.

Dabeecadda xafladda duugtu waa arin doorasho u ah dadka ku lugta leh. Sidaa darteed majiro sharci dhigaya in ay waajib tahay in xafladda lagu qabto naxashka. dadku waxay xushmaddooda ugu danbaysa u muujin karaan macsalaamayna karaan kahor inta qofka aan la galin naxashka isbitaalka ama guriga, ama marka la gubo kaddib asagoo kujira weelka danbaska.

Sidoo kale waxaa jira xulashada ah in aan wax xaflad ah la qaban. Xaaladahaas oo kale, qofka dhintay waxaa lagu qaadayaa naxashka ayadoo laga qaadayo guriga ama isbitaalka si toos ah loona qaadayo qabuuraha si loo aaso ama meesha maydka lagu gubo si loo gubo, kadibna waxaa lagu soo celinayaa qabuuraha halkaasoo danbaska lagu aasayo ama lagu firdhinayo.

### ADEEGA DUUGTA EE XUBNAHA KANIISADDA ISWIIDHAN

Xubnaha Kaniisadda Iswiidhan ayaa bixinaysa kharashka kaniisadda. Baaxadda kharashka waxaa lagu muujinayaa canshuurta sanadlaha ah ee qof kastaa bixiyo ((*slutskattebesked*). Kharashka kaniisadda waxaa kujira adeega duugta ka dhacaya kaniisadda leh baadariga (wasiir Lutheran), muusikaystaha kaniisadda/mulaxamka, naxash hayeyaalka (sidoo kale loo yaqaan pallbearers) iyo caawiyaha soo dhaweynta dadka ka qayb galaya duugta. Tani waxa ay sidoo kale khusaysa haddii adeegga aasku ka dhacayo kaniisad ka duwan midda ku taala meesha uu qofka dhintay ku noolaa.

Baadariga/wasiir Lutheran kaasoo hogaamin doonaa adeegga, qaraabada, muusikaystaha/mulaxamka kaniisadda iyo ka qayb galeyaasha kale ayaa si wada jir ah isula go`aan sanaya waxyaabaha kujira adeega. Maamul kaniisado fara badan waxa ay leeyihiin siyaasad loo yaqaan *begravningspastoral* oo loogu tala galay adeegyada duugta, kuwaas oo qeexaya shaqada maamulka kaniisadda ee arimaha la xiriira duugta. Siyaasaddu waa mid u kala duwan maamulada kaniisadaha.

Adeegyada duugta waxaa caadiyan lagu qabta kaniisadda ama macbadka duugta. Maamulka kaniisadda iyo baadariga/wasiirka hogaaminaya adeegga duugta ayaa go`aan sanaya in adeegga lagu qaban karo meel kale sida guriga qofka ama beer.

Adeegyada Kaniisadda Iswiidhan waa kuwo u furan qof kasta bookhadeyaashana lagama hor istaagayo in ay kasoo qayb galaan. Tani waxay sidoo kale khusaysaa adeegyada duugta. Faafinta ogaysiiska geerida kaddib markii adeegga duugtu uu dhaco waxay noqon kartaa waddo furan si loo yareeyo tirada dadka imaanaya adeegga haddii sidaan la doorbido.

Adeegga duugta waxaa lagu soo gabagabayn karaa laba qaab:

- Haddii adeeggu ku dhamaado **qabuuraha**waxa uu kusoo gabagaboobayaa in naxashka qabriga la dhigo. Dadka baroor diiqayaa waxa ay isugu soo aruurayaan qabriga dhinaciisa si ay xushmaddoodii u danbaysay u siiyaan baadariguna/wasiirkuna waxa uu aqrinayaa ducada gabagabada ah. Naxashka waxa qabriga la gaynayaa ayada oo ay la socdaan dadka naxashka qaada (dadka naxashka qaada). Maamulka kaniisadda ayaa go`aaminaya heerka adeegga naxash qaadidda ee la bixiyaya. Tusaale ahaan, waxa uu ka koobnaan karaa sariir luga leh (sariirta maydka ama qaab) iyo qalab naxashka hoos u dhiga kaas oo ay lacagtiisa bixiyeen maamulka kaniisaddu. Haddii ay jecel yihiin, qaraabada iyo saaxiibadu waxa ay naxashka u qaadan karaan qabriga si ay xushmaddii u danbaysay u siiyaan qofka dhintay.

- Haddii adeegga duugta lagu soo gabagabeeyo **kaniisadda/macbadka** dadka baroor diiqayaa waxa ay isugu soo aruurayaan naxashka ama weelka danbaska si ay xushmaddoodii u danbaysay u siiyaan. Xafladda kaddib, marka qaraabadu ay qolka ka tagaan, naxashka waxaa loo qaadayaa meesha lagu gubo ama qabriga sidaa si lamid weelka danbaska.

## ADEEGGA DUUGTA EE DADKA AAN XUBINTA KA AHAYN KANIISADDA ISWIIDHAN

Adeeg duug ayaa loo qaban karaa dadka aan xubinta ka ahayn Kaniisadda Iswiidhan haddii ay jiraan sababo gaar ah oo sidaa loo samaynayo tanina waxa ay ka turjumaysaa dardaaranka qofkii dhintay. Vicar (madaxa baadariga) ee kamidka ah maamulka kaniisadda ay qusayso ayaa go`aan sanaya in adeeg duug la qabanayo iyo in kale. Xaaladahaas oo kale kharash ayaa laga qaadaa adeegga duugta. Intooda badan waxa ay ku kala badalnaan karaan maamulada kaniisadaha kala duwan.

Waa muhiim in waqti ku filan lagala hadlo maamulka kaniisadda suurta galnimada in la qabto adeeg duug ayada oo la isticmaalayo qaabka adeegga Kaniisadda Iswiidhan iyo wax ku saabsan arimaha dhaqaale marka sidaa la samaynayo.

## XAFLADAHA DUUGTA EE BULSHOOYINKA CAQIIDOOYINKA KALE

Bulshooyin badan oo caqiidooyin kala duwan leh ayaa ka jira Iswiidhan, marka lagu daro Kaniisadda Iswiidhan. Qaar badan oo ayaga kamid ah ayaa dadkooda siiya xaflad duugeed. Marka qofka dhintay uu xubin ka ahaa bulsho caqiido, qofka qabanqaabinaya duugta waa in uu la xiriiraa wakiilo ka socda caqiido diimeedkaas si loo qorsheeyo xafladda sagoontintinta.

### DUUGAHA BULSHADA

Xafladda duugta ee aan raacayn qaabka adeegga duugta ee Kaniisadda Iswiidhan ama qaabka adeeg marka la eego bulsho leh caqiido diimeed gaar ah waxaa loo yaqaan duug bulsho. Dhammaan maamulada aasasku waa in ay siiyaan goobo aan lahayn calaamado diimeed xafladaha sagoontinta. Kharashka isticmaalidda dhismeyaashaas oo kale waxay kujiraan kharashka duugta. Qaraabada ayaa qabanqaabsanaysa mas`uulna ka ah xafladda duugta ayaga ayaana go`aan sanaya waxa lagu darayo, sida loo qabanayo iyo cidda ka qayb galaysa.

Hogaamiyeyaasha duugta dadweynaha waxaa laga helaa dhowr magaalo, laakiin mid kasta, lagama helo. Majiro fasax ama ogolaansho gaar ah oo looga baahan yahayin la noqdo hogaamiyaha duugta bulshada, mana jiraan wax ka hor istaagaya qaraabada iyo saaxiibada in ay ayagu hogaamiyaan xafladda bulshada. Kharashka hogaamiyaha duugtu kuma jiro kharashka duugta waana in laga bixiyaa hantida uu qofka dhintay ka tagay.

## Qabuuraha

Kharashka duugta waxaa kujira qabriga ama wax u dhigma qabuuraha dadweynaha muddo ah 25 sano. Waxaa jira noocyo badan oo qabuuro ah sida *kistgravplats* (qabriga naxashka), *urngravplat*s (qabriga weelka danbaska), *askgravplat*s (qabriga haraadiga maydka la gubay); iyo meel banaan *minneslund* (nooc ah beerta xasuustaa), *kistminneslund* (tusaale. goob dhulka alwaaxdu ka baxdo ah oo wax lagu aaso halkaasoo naxashka lagu aaso goob wadareed) ama askgravlund (goob dadka lau aaso si wadar ah sida beerta xasuusta, laakiin taasoo danbaska la aasayo oo aan la firdhinayn); iyo qoldhob kujira *kolumbarium* ama *urnmur* (qol dhisme ku dhex yaal ama ka baxsan). Majirto xuquuq ah in si hor maris ah qabri loo damaanad qaado.

### QABUURAHA KHAASKA AH

Xaquuqda ku duugitaanka qabuuraha dadweynaha waa in aan loo fiirin in qofka dhintay oo kamid ahaa bulsho caqiido diimeed gaar ah. Si kastaba ha ahaatee, tani ma khusayso xaqa ku aasidda qabuuraha gaarka ah ee dadka aan kamidka ahayn bulshada caqiidada Kiristaanka. Ayada oo aan wax khidmad ah laga qaadayn hantida qofka dhintay, dhammaan maamulada duugaha waxaa waajib ka saaran yahay deegaan maamuleed kooda ama deegaan maamuleedka u dhow, si ay u siiyaan qabuuro khaas ah dadka aan xubnaha ka ahayn bulshada caqiidada Kiristaanka. Qofka dhintay ama qaraabadiisu waxaa laga yaabaa in uu jeclaan lahaa ama ay jeclaan lahaayeen in ay helaan qaabayn gaar ah oo qabuuruhu yeeshaan ama in ay boos gaar ah ku yeeshaan goob cayiman. Maamulka aasku waa in sidoo kale ay bixiyaan gaadiidka lagu tagayo qabuuraha khaaska ah ayada oo aan wax khidmad ah laga qaadayn hantida qofka dhintay.

### QABUURAHA KU YAALA GOOBAHA KALE

Maamulka aasitaankana waxaa ku waajib ah in ay qabri siiyaan dhammaan dadka deegaanka ee dhinta kuwaasoo ka diiwaan gashan diiwaanka shacabka ee deegaan maamuleedka maamulka. Sharciga Duugta Iswiidhan waxa uu xaq u siinayaa dadka dhinta in qabriga la dhigo si bilaash ah goob kale oo aan ahayn halka laga diiwaan galiyay diiwaanka shacabka, marba haddii goobta qabriga la heli karo. Si aad u hesho macluumaad ku saabsan qabuuraha, la xiriir maamulka aaska ay khusayso.

> *Arinta helitaanka dhul qabuuro laga dhigo, qabuuraha dadka kale ayaa halkaas laga bixin karaa.*
>
> CUTUBKA 2AAD, QAYBTA 3AAD, SADARKA 3AAD EE SHARCIGA DUUGTA EE ISWIIDHAN

### HDADKA HAYSTA XAQUUQAHA DUUGTA

Xaquuqaha duugtu waxa ay khuseeyaan dhammaan qabuuraha gaar ka ah, si kasoo horjeedda qabuuraha sida wadarta ah loo isticmaalo, kuwaasoo xaquuqaha duugta aanay khusayn. Eeg qaybta *Noocyada qabuuraha*. Xaquuqaha duugitaanku si iskood ah uma khuseeyaan si xariir la leh duugta. Taas badalkeeda, waxa ay kasoo baxaan xaquuqaha duugta ee ay u damaanad qaadaan kooxda jamaacada/maamulka kaniisada qof, caadiyan xubin kamid ah qoyska qofka dhintay, ama qaraabo u dhow. Qofka ama dadka loo damaanad qaday xaquuqda aaska waxaa

loo yaqaan hayteyaasha xaquuqda duugta. Haysteyaasha xaquuqda duugta waxaa lagu diiwaan galiyaa diiwaanka maamulka qabriga. Kaliya dadka xaquuqda haysta ama qofka xaquuqda haysta ayaa isticmaali kara xaquuqda duugta. Xaquuqaha duugtu waxa ay la yimaadaan xaquuqaha iyo waajibaadka labadaba.

> *– xaquuqaha duugta: xaquuqaha dhasha marka isticmaalka qabri cayiman oo ku yaala qabuuraha dadweynaha ay u damaanad qaaddo waax maamusha qabuuraha qof ayadoo laga lee yahay ujeeddo duugitaan.*
>
> CUTUBKA 1AAD, QAYBTA 1AAD EE SHARCIGA DUUGTA EE ISWIIDHAN

Dadku waxay xaquuqda duugta ku heli karaan dhowr qaab. Marka isticmaalka qabri cusub la damaanad qaado, waa mas`uuliyadda qaraabada nool in ay go`aan sadaan qofka (dadka) kamidka ah qaraabada nool ee ay u dooranayaan in uu qaato (ay qaataan) xaquuqda duugta. Waa in codsi loo gudbiyaa fursadda ugu horeysa maamulka duugta kaasoo degmadiisa lagu aasayo qofka dhintay. Qofna laguma khsbi karo in uu noqdo haystaha xaquuqda duugta. Haddii uusan jirin qof doonaya in uu noqdo haystaha xaquuqda duugta, waa in lagu wargaliyaa maamulka duugta. Haddii uusan jirin qof noqon kara ama doonaya in uu noqdo haystaha xaquuqda duugta, wali qabriga waa loo kaydinayaa qofka dhintay ilaa 25 sano. Maamulka duugta ayaa dabadeed mas`uul ka ah maaraynta qabriga. Si qaraabada loogu ogolaado in ay samaystaan xasuus qabri, maamulka duugtu waxa ay u baahnaan karaan lacag si ay u ilaaliyaan . Haddii qofka haysta xaquuqda duugta uu dhinto, xaquuqda waxaa lagu wareejinayaa qof kamid ah koox dad ah oo khaas ah. Qaraabada ama dadka sida dhow ugu xiran qofka dhintay ama qof dhintay oo lagu duugayo qabriga ayaa ah dadka kaliya ee qaadan kara xaquuqda duugta. Hantida qofka haysta xaquuqda duugta ee qofka dhintay waa in ay ku koobnaataa lix bilood laga bilaabo ogaysiiska dhimashada ee damaand qaadaha - maamulka duugta - kaasoo qofku ama dadku uu/ay ku matalayaan in ay yihiin haysteyaasha xaquuqda duugta, ama in uusan jirin qof lagu wareejiyo xaquuqda duugta. Qofka xaquuqda u haysta duugta waxa uu si qoraal ah ku caddayn karaa cidda loo gudbinayo xaquuqda duugta marak uu dhinto/ay dhimato. Sidaa darteed qofka la caddeeyay waa in uu xiriir la leeyahay ama sida kale uu si dhow ugu xiran yahay midkood qofka haysta xaquuqda duugta ama qof lagu aasay qabriga ay khusayso. Haddii qofka haysta xaquuqda duugta uu qof u cayimo in uu la wareego xaquuqda duugta, ma ahan in hantida laga gooyo wax haysasho xaquuq duugid ah oo cusub.

Xaquuqda duugta waxaa sidoo kale la wareejin karaa inta lagu jiro nolosha qofka haysta hadda xaquuqdooda. Xaquuqda duugta waxaa kaliya lagu wareejin karaa qof la xiriira ama sida kale si dhow ugu xiran wareejiyaha ama qof ku duugan qabriga. Maamulka duugta ayaa kama danbaysta go`aan sanaya cidda noqonaysa qofka haysta xaquuqda duugta. Racfaan ka dhan ah go`aanka maamulka duugta ayaa loo gudbin karaa guddiga maamulka ismaamulka (länsstyrelsen). Xaquuqda duugta waxaa sidoo kale lagu soo celin karaa wareejiyaha kahor inta muddada xaquuqdu aysan dhicin. Marka xaquuqda duugtu ay dhacdo, waa la soo cusboonaysiin karaa waqti ah ugu yaraan 15 sano iyo ugu badnaan 50 sano. Maamulka duugeed kastaa waxa uu samaysanayaa shuruudihiisa soo cusboonaysiinta xaquuqaha duugta. Kharashka soo cusboonaysiinta waxa diyaarinaya golaha maamulka kaniisadda ama golaha dowladda hoose.

Qofka haysta xaquuqda duugta waxa uu xaq u leeyahay in uu go`aan sado dadka lagu aasi karo qabriga, ayada oo aan loo fiirinayn in ay qaraabo yihiin ama ay si dhow ugu xiran yihiin qaab kale. Xaaladaha intooda badan, qofka haysta xaquuqda waxa uu sidoo kale xaq u leeyahay naftiisa ama nafteeda in lagu aaso qabriga. Qofka dhintay ee aan lahayn hal qof oo xaq u leh haysashada xaquuqda duugta ee qabriga lagu aasayo, dhammaan dadka haysta xaquuqda duugta waa in ay bixiyaan fasaxooda. Haddii dadka haysta xaquuqda duugta aysan heshiis gaari karin, damaanad qaadaha (maamulka duugta) ayaa go`aan sanaya in qofka dhintay lagu duugayo qabriga iyo in kale. Go`aanka maamulka duugta racfaan ayaa laga qaadan karaa.

## NOOCYADA QABUURAHA

Gudaha Iswiidhan waxaa kajira noocyo badan oo qabuuro ah. Ma ahan in dhammaan noocyada ay bixiyaan maamulada duugtu. Heerka la bixinayo waxaa go`aaminaya xaalado sida baahida ka dhex jirta maamulka kaniisadda. Maamulada duugta ee kala duwan waxaa laga yaabaa in ay yeeshaan magacyo kala duwan iyo tafaasiisha noocyo kala duwan oo qabuuro ah. Qaar kamid aha qabuuruhu waxa ay leeyihiin xaquuqo duugeed, qaar waxay leeyihiin xaquuq duug oo xaddidan kuwana waxba ma lahan.

Noocyada qabuuraha **ee leh xaquuqaha duugta**waa *kistgravplatser* (qabuuraha naxashka), kuwaasoo leh meel banaan oo loogu tala galay hal ama ka badan oo naxash ah (ama weelka danbaska), iyo *urngravplatser* (qabuuraha danbaska), kaasoo leh meel banaan oo loogiu tala galay ama ka badan oo danbas ah. Xaquuqaha waxaa kamid ah xaq u yeelashada in la qurxiyo qabriga iyo, kaddib markii fasax laga helo maamulka duugta, in aad yeelato qabri dhagax ah ama xasuus kale oo laga taago ama lagu rakibo. Dhagaxa qabrigu maahan mid waajib ah. Qofka haysta xaquuqda duugta waxa uu qaabriga dhigi karaa ubaxyo iyo shumacyo/nalalka birbirqa xataa marka aan dhagaxa qabrigu uusan jirin. Xasuusaha qabriga waxaa bixinaya, waana hantida, qofka xaquuqda u haysta duugta. Dadka xaquuqda u haysta duugta waxaa ku waajib ah in ay qabriga ka dhigaan mid nadiif ah kuna jira xaalad wanaagsan. Marka lagu daro ilaalinta qabriga – eeg qaybta *ilaalinta qabuuraha* – tan waxaa kamid ah xaqiijinta in qabriga ama xasuusaha kale aysan khatar galin badqabka qabriga ama goobta ku dhagan. Qofka haysta xaquuqda duugta sidaa darteed waa in uu qaataa, uuna bixiyaa, talaabooyin si uu u xaqiijiyo in qabriga ama xasuusaha kale aysan kujirin khatar badqab. Haddii loo baahdo tilaabo si looga hortago shilal dhici kara, maamulka duugtu waa in uu qaado talaabooyin ku haboon. Qofka xaquuqda u haysta duugta waa in lagu wargaliyaa talaabooyinkaas oo kale sida ugu dhaqsaha badan. Talaabooyinka badqabka ama dayac tirka ee lagu sameeyo qabriga ama xasuusaha kale xaaladaha intooda badan waxaa bixiya qofka xaquuqda u haysta duugta.

Qabuuraha leh **xaquuqaha duugta ee xaddidan**waxa kamid ah xaddidaadaha ku imaanaya xaquuqda qofka xaquuqda u leh duugta ee go`aansiga muuqaalka iyo sida ay noqonayso xasuusta qabrigu iyo xaaladaha kale ee qurxinta iyo diyaarinta qabriga. Damaanad qaaduhu waxa uu xaq u leeyahay go`aanka xaaladahaas oo kale. Damaanad qaaduhu waxa uu mas`uul

kayahay ilaalinta qabriga sida adeegga qofka haysta xaquuqda duugta. Damaanad qaaduhu waxa uu khidmad saarayaa ilalinta marka isticmaalidda qabriga la damaanad qaado. Tani waxay khusaysaa *qabuuraha loogu tala galay haraadiga maydka la gubay waxaana loo yaqaa askgravplatser, qoldhob ku yaalaa kolumbarium* (qol gudaha ah) iyo qoldhob ku yaala *urnmur* (qol dibadda ah), micno ahaan "gidaarka weelka danbaska", kaasoo meel banaan sii kara hal ama labo weelka danbaska ah. Noocyada qabuuraha **aan lahayn xaquuqda duugta**waa*askgravlund* (beer loogu tala galay xasuusta taasoo danbaska lagu duugo ama lagu firdhiyo), a *minneslund*(beer loogu tala galay xasuusta) iyo *kistminneslund* – sida dhulka alwaaxdu ka baxaan halkaasoo naxashka lagu duugo goob wadareed. Maamulka duugtu waxa ay xanaanaynayaan ilaalinta goobahaan. Qaraabada waxaa caadiyan lagu casuumayaa in ay ka qayb galaan duugta danbaska nooca ah beerta xasuusta ee loogu yeero *askgravlund.* Qoraal muujinaya magaca qofka la aasayo ayaa la dalban kara ayna ka taagi karaan maamulka duugtu goob gaar ah. Qoraalkaas waxaa caadiyan bixinaya hantida ama qaraabada qofka dhintay. *minneslund* iyo *kistminneslund* waa goobo duug oo aan la aqoon, halkaasoo shaqaalaha qabuuruhu ay ku firdhiyaan/ku duugaan danbaska ama ay ku duugaan naxashka ayada oo qaraabada qofka dhintay aysan joogin. Labada nooc ee beeraha xasuusta, *askgravlund* iyo *minneslund*, khaasatan loogu tala galay goobaha wadarta waxaa ay qaraabadu siinayaan qurxin.

## ILAALINTA QABUURAHA

Marka lagu daro mas`uuliyadda ah dhajinta xasuusta sida dhagaxa qabriga, qofka haysta xaquuqda duugta waxaa ku waajib ah in uu qabriga ka dhigo xaalad nadiif ah oo sharaf leh. Tani waxay khusaysaa qabuuraha leh xaquuqda duugta, tusaale *kistgravplatser* (qabuuraha naxashka) iyo *urngravplatser* (qabuuraha danbaska). Ilaalinta qabriga caadiyan waxay la xiriirta talaalidda iyo waraabinta dhirta iyo ubaxyada, qashin ka jaridda, saaridda ubaxyada caddaaday iyo simidda/qurxinta cawska ku yaalla hareeraha xadduudaha qabriga, ama, xanaanaynta carrada ku daboolan qabriga, ka saaridda qashnka oogada carrada qabriga. Qofka xaquuqda u leh duugta waxa uu naftiisa/nafteeda u ilaashan karaa qabriga ama waxa uu iibsan karaa adeegga, tusaale ahaan waxa uu ka gadan karaa waaxda maamulka qabuuraha. Inta badan maamulada kaniisadaha/kooxaha maamulada kaniisdaha waxay bixiyaan qandaraasyada ilaalinta qabuuraha. Heerka ilaalinta waxaa go`aaminaya kharashka qofka haysta xaquuqda duugta. Qiimuhu waa mid u kala duwan maamulada kaniisadaha/kooxaha maamulada kaniisadaha. Qandaraasyada ilaalinta qabuuraha laguma maamulo Sharciga Duugta Iswiidhan. Qofka haysta xaquuqda duugta waa in uu qiimeeyaa uuna is barbar dhigaa qiimaha iyo tayada iskiis. Haddii qofka haysta xaquuqda duugtu uu ilaalsanayo qabriga ayna maamulka duugtu u arkaan in qabriga si cad loo dayacay, maamulku xaquuqda duugta waa uu qaadan karaa si kale haddii loo dhaho, xaquuqda waxaa lagu soo celinayaa maamulka.

> *Dadka xaquuqda u haysta duugta waxaa ku waajib ah in ay qabriga ka dhigaan mid nadiif ah kuna jira xaalad wanaagsan.*
>
> CUTUBKA 7AAD, QAYBTA 3AAD EE SHARCIGA DUUGTA EE ISWIIDHAN

## Mayd gubidda

Marka la eego Sharciga duugta Iswiidhan, kaliya dadka ka shaqeeya qabuuraha dadweynaha ama maamulka kaniisadda ayaa samayn kara kana shaqayn kara goobaha maydka lagu gubo.

Qofka dhintay waxaa la gubayaa sida ugu dhaqsiyaha badan xafladda duugta kaddib. Ka hor inta aysan gubiddu dhicin, shahaadada gubitaanka waa in laga soo qaataa Hay`adda Canshuurta Iswiidhan. Xaaladaha intooda badan, agaasimeyaasha duugtu waxa ay ku caawin karaan qaraabada arintaan. Ayada oo uu sabab u yahay hanaanka qurmidda oo ku bilaabanaya jirka qofka dhintay iyo ayada oo laga fikirayo dadka la tacaamulaya qofka dhintay, waa mid muhiim ah in gubitaanku uu u dhaco sida ugu dhaqsaha badan.

> *Maydka qofka dhintay [...] waa in la gubaa ama la aasaa sida ugu dhaqsaha badan waqti aan ka danbaynin hal bil kaddib marka qofku uu dhinto. Hay`adda Canshuurta Iswiidhan ayaa si kastaba ha ahaatee, daamanad qaadi karta, dib u dhigista gubidda maydka ama aaska haddii ay jiraan sababo khaas ah oo sidaa loo samaynayo.*
>
> CUTUBKA 5AAD, QAYBTA 10AAD EE SHARCIGA DUUGTA EE ISWIIDHAN

Qaraabada waxaa loo ogolyahay in ay ka qayb galaan gubidda maydka waana in ay la xiriiraan meesha lagu gubayo si ay u helaan macluumaad dheeri ah.

Gubidda maydka kaddib, shay kasta oo bir ah oo ka weyn 3 mm waa laga reebayaa danbaska waxaana loo qaadayaa dib u hagaajin. Kuwaan waxaa kamid noqon kara waxyaabaha jirka ku dhagan iyo waxyaabah kuxiran/qalabka adag ee ka socda naxashka. Ayada oo aysan jirin damaanad ah in dahabka uu qofka dhintay xirnaa lagu dari doono weelka danbaska asaga oo la socda danbaska, qaraabadu waa in ay ka saaraan ashyaada dahabka ah kahor inta qofka dhintay aan naxashka la galin. Haddii qaraabadu jeclaadaan in ay dhigaan waxkasta dahab ah weelka danbaska kahor inta aan daboolka la xirin, shaqaalaha meesha maydka lagu gubo waa in si hore si wanaagsan loo xiriiraa si ay u sharaxaan sida arinkaan loo samayn karo.

Ayada oo ay kiu xiran tahay nooca qabriga la doorto, boorso khaas ah ama santuukh ayaa noqon kara mid baddali kara weelka danbaska. Xaaladaha qaarkood, danbaska waxaa aruursan kara qaraabada.

> *Kaddib marka maydka la gubo, danbaska waxaa kaliya oo aruursan kara shakhsi haddii asaga ama ayada uu ama ay*
> *– uqaadi doono ama qaadi doonto danbaska qabuuraha aan ku oolin meesha maydka lagu gubay,*
> *– ku aasi doono ama ku firdhin doono ama ay ku aasi doonto ama ku firdhin doonto meel aan ahayn qabuuraha,*
> *– ama danbaska uu u qaadayo ama ay u qaadayso meel ka baxsan Iswiidhan.*
>
> CUTUBKA 5AAD, QAYBTA 10AAD EE SHARCIGA DUUGTA EE ISWIIDHAN

## Aasidda naxashka iyo aasidda ama firdhinta danbaska

Ayada oo uu sabab u yahay hanaanka qurmidda oo ku bilaabanaya jirka qofka dhintay iyo ayada oo laga fikirayo qofka dhintay, waa mid muhiim ah in gubitaanku uu u dhaco sida ugu dhaqsaha badan.

> *Maydka qofka dhintay [...] waa in la gubaa ama la aasaa sida ugu dhaqsaha badan waqti aan ka danbaynin hal bil kaddib marka qofku uu dhinto. Hay`adda Canshuurta Iswiidhan ayaa si kastaba ha ahaatee, daamanad qaadi karta, dib u dhigista gubidda maydka ama aaska haddii ay jiraan sababo khaas ah oo sidaa loo samaynayo.*
>
> CUTUBKA 5AAD, QAYBTA 10AAD EE SHARCIGA DUUGTA EE ISWIIDHAN

Ka hor inta uusan aasku dhicin, shahaadada aaska waa in laga soo qaataa Hay`adda Canshuurta Iswiidhan. Agaasimeyaasha duugtu waxa ay ku caawin karaan qaraabada arintaan. Tani shahaadada gubitaanka la helo, waxa ay sidoo kale khusaysaa aasitaanka weelka danbaska ama danbaska.

Sharciga Duugta ayaa qeexaya waxa lagala jeedo *gravsättning*, aasidda naxashka iyo aasidda ama firdhinta danbaska.

> *...aaska: dhigidda qofka dhintay ama danbaska qabri gaar ah ama goob aas oo loogu tala galay isticmaalka wadar ahaan ayada aysan jirin qabuuro gaar ah ama firdhinta danbaska ee lagu firdhyo beer xasuuseed dhexdeed ama meel aan ahayn qabuuro.*
>
> CUTUBKA 1AAD, QAYBTA 1AAD EE SHARCIGA DUUGTA EE ISWIIDHAN

Sharciga ugu weyn waa in aasku ama firdhintu ka dhacdo qabuuraha. Kaddib markii fasax laga elo guddiga maamulka ismaamulka, waa suurto gal in sidoo kale firdhinta danbasku ka dhacdo goob ka duwan.
Danbaska waa in la aasaa ama la firdhiyaa waqti aan ka danbayn hal sano kaddib gubitaanka.

> *Jirka qofka dhintay waxaa kaliya oo lagu aasi karaa ama lagu firdhin karaa qabuuro dadweyne ama kuwo gaar loo leeyahay. Si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa in dowladdu, si kastaba ha ahaatee, ay sii saarto tilmaamo sheegaya in danbaska loo maareeyo qaab gooni ah. Go`aanada noocaas ah waxaa soo saaraya guddiga maamulka ismaamulka.*
>
> CUTUBKA 5AAD, QAYBTA 5AAD EE SHARCIGA DUUGTA EE ISWIIDHAN

Hadddii danbaska laga keeno meel ka baxsan Iswiidhan, waxaa waajib ah in la aaso ama la firdhiyo waqti aan ka danbayn hal sano kaddib marka Iswiidhan la keeno.

Waa mid guud ahaan suurto gal u ah qaraabada in ay iskood naxashka ama weelka danbaska u dhigaan qabriga. Arintaan waa in si hormaris looga diyaariyaa maamulka duugta. Sababo amaan dartood, qaraabada looma ogola in ay qodaan ama ay dib u buuxiyaan (gadaal buuxin) qabriga naxashka. Si kastaba ha ahaatee, qaraabada waxaa loo ogol yahay in xaadir ahaadaan ama ay gacan ka gaystaan sidoo qabriga loo buuxin lahaa.

## KU FIRDHINTA DANBASKA DHULKA AMA BIYAHA

Sharciga Duugtu waxa uu awood siinaya fursadda ah ku firdhinta danbaska dhulka korkiisa ama biyaha korkooda kaddib markii fasax laga helo guddiga maamulka ismaamulka. Guddiga ayaa samaynaya sharciga firdhinta danbaska lagu samaynayo goobta uu mas`uulka ka yahay. Goobta qaraabado ay jecelyihiin in ay ku firdhiyaan danbaska waa in ay ahaataa mid ku aboon danbaskana waa in loo maamulaa si xushmad kujirto. Codsiga fasaxa lama qiimayn karo si hormaris ah, kaliya waxaa la qiimayn karaa marka qofku dhinto kaddib. Codsiga firdhinta danbaska qofka dhintay waxaa lagu samayn karaa si onlayn ah ayada oo la isticmaalayo adeegga elektoroonigga ah ee *www.lansstyrelsen.se*.

Qofka hela fasaxa in uu firdhiyo danbaska waxaa waajib ku ah in uu, inta lagu jiro muddada ay guddiga maamulka magaaladu u sameeyeen, uu kusoo gudbiyo caddayn ku socota guddiga taasoo sheegaysa in danbaskii loo firdhiyay si waafaqsan fasaxa.

*Guddiyada maamulka ismaamulka ee ismaamulada soo socda ayaa sameeya codsiyada firdhinta danbaska: Skåne, Östergötland, Västra Götaland, Stockholm, Dalarna, Västernorrland iyo Norrbotten.*

## Korjoogtaynta duugaha, gubidda maydka iyo xabaalaha

Guddiga maamulka ismaamulka ayaa mas`uul ka ah korjoogtaynta duugaha, gubidda maydka iyo aasaska ka dhaca gudaha Iswiidhan, ayada oo aan loo tixgalinayn in maamulka duugtu uu yahay maamul kaniisad, koox ka socota maamul kaniisad ama dowlad hoose. Si barbar socota la xiriiridda guddiga maamulka ismaamulka, dadku waxay codsi iyo dhaleecayn khusaysa aaska, gubidda iyo duugta u gudbin karaan *begravningsombud* (wakiilada duugta), maamulka kaniisadda ama dowladda hoose, ayada oo ay ku xiran tahay cidda ah maamulka duugta ee goobta.

### GUDDIGA MAAMULKA ISMAAMULKA

Mid kasta oo*länsstyrelse ah*, guddiga maamulka ismaamulka, waxa uu leeyahay dhowr mas`uuliyadood kuwaas oo uu dhigayo Sharciga Duugtu. Dadka qaba cabashooyinka ama su`aalaha ku saabsan shaqada duugta, aaska ama gubidda maydka waxay teleefoon u diri karaan ama waraaq u qori karan guddiga. Su`aalahaan waxay noqon karaan kuwo khuseeya kharashka duugta ama sida maamulka duugtu uu ula tacaamulo arimaha, tusaale ahaan. Sida marka horeba, guddiga maamulka ismaamulku waxa uu sidoo kale qiimeeyaa racfaanada laga qaato go`aanada uu sameeyo maamulka duugtu ee xaalado kaligood ah sida waafaqsan Sharciga Duugta. Isla guddiga maamulka ismaamulka soo saaraya codsiga firdhinta danbaska, ayaa soo saaraya cabashooyinka qiimaynayana racfaanada laga qaato duugaha, shaqada aasitaanka iyo gubidda maydka; eeg qaybta *Ku dul firdhinta danbaska dhulka iyo biyahar.*

### WAKIILADA DUUGTA

> *Marka maamulka kaniisaddu yahay maamulka duugta, guddiga maamulka ismaamulku waa in uu magacaabaa mid ama ka badan oo ah wakiilada duugta si ay u qiimeeyaan sida maamulka kaniisaddu u ilaalin karo daanaha dadka aan xubinta ka ahayn Kaniisadda Iswiidhan.*
>
> CUTUBKA 10AAD, QAYBTA 2AAD, SADARKA 1AAD, EE SHARCIGA DUUGTA EE ISWIIDHAN

Marka lagu daro howsha korjoogtaynta iyo dib u eegista, guddiga maamulka ismaamulku waxa uu magacaabayaa wakiilo duugeed. Shaqada *begravningsombud* waa in la qiimeeyaa sida maamulka kaniisaddu uu u daryeelayo danaha dadka aan xubinta ka ahayn Kaniisadda Iswiidhan. Wakiilku waa gacanta guddiga maamulka ismaamulka ee korjoogtaynta maamulada duugta ee Kaniisadda.

Guddigu waxa uu magacaabayaa hal ama ka badan oo wakiilo uga ah dhammaan goobaha aysan dowladda hoose ku lahayn kaalinta maamulka aasitaanka. Guddiga maamulka

ismaamulka iyo maamulka aasku waxa ay dadweynaha ku wargalin karaan wakiilada dowladda hoose ee duugtu cidda ay yihiin.

Wakiiladu waa in ay dadka aan xubbinta ka ahayn Kaniisadda Iswiidhan ku waargaliyaan kaalintiisa ama kaalinteeda ayna xiriir joogta ah la lahaadaan wakiilada dadka haysta caqiidooyinka kale. Wakiiladu waa in ay keenaan codsiyadooda khuseeya duugaha, gubidda maydka iyo aasaska ayna u gudbiyaan dhinaca ay khusayso. Tani waxay sidoo kale khusaysaa codsiyada ku saabsan goobta xafladda ee aan lahayn calaamada diimaha.

Wakiilku waa in uu heli karo dhammaan dukumiintiyada khuseeya duugta, aaska iyo shaqada gubidda maydka ee maamulka kaniisadda laguna wargaliyo sida kharashka uu bixiyay loo isticmaalayo. Kharashka aaska kaliya waa in loo isticmaalaa shaqada duugta, aaska iyo gubidda maydka.

Wakiilku waa in uu sidoo kale xaqiijiyaa in bulshada aan haysan caqiidada Kiristaanka laga siiyo qabuuro gaar ah meel masaafo ahaan la aqbali karo. Maamulka duugta – maamulka kaniisadda/kooxda maamulka kaniisadda ama dowladda hoose – ayaa ah qaybta ay waajibka ku tahay qabuuraha gaarka ah.

## Liiska qaraabada

**QARAABADA AMA DADKA KALE EE KU DHOW QOFKA DHINTAY WAXA AY SAMAYSAN KARAAN WAXYAABAHA SOO SOCDA EE LA XIRIIRA DUUGTA, GUBIDDA MAYDKA AMA AASKA:**

- Ka qaadidda maydka isbitaalka ayada oo la gaynayo dhismayaasha maamulka duugta ama gaynta qabuuraha
- In ay guriga ku hayaan maydka kahor inta aan maydka la galin naxashka/kahor xafladda macsalaamaynta/kahor inta aan maydka loo qaadin xabaasha ugu danbaysa.
- In ay doortaan ama sameeyaan naxash iyo weelka danbaska. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha ku xiran samaynta naxashka iyo/ama weelka danbaska, fadlan kala xiriir maamulka duugta.
- Qabanqaabinta dharka ama kafanta maydka iyo dhigista maydka naxashka.
- Dhigista waxyaabo yaryar ama waraaqo naxashka (arintaan marka hore ay kala hadlaan maamulka duugta).
- Doortaan kaniisad, macbad ama dhisme loogu tala galay adeegga duugta ama xafladaha sagoontin ee kale.
- Qoraan ogaysiiska geerida si loo shaaciyo.
- Qorsheeyaan xafladda duugta (caadiyan ayadoo lala jiro baadariga/wasiirka ama madax duugeed kale).
- Qabanqaabinta soo dhawaynta duugta.
- U qurxinta naxashka iyo dhismayaasha xafladda sagoontinta ah.
- Doortaan xulashadooda daaha/marada maydka (maro lagu dado naxashka)
- Qaadidda iyo gaynta naxashka ama weelka danbaska.
- Ka qaybgalka mayd gubidda.
- Dhigista naxashka ama weelka danbaska qabriga.
- Ku firdhinta danbaska meel aan ahayn qabuuro – kaddib marka ay helaan fasax ka yimaada guddiga maamulka ismaamulka, *länsstyrelse*.
- Doorashada ama samaynta dhagaxa qabriga ama xasuusaha kale ee qabriga. Arintaan waa in uu meelmariyo maamulka duugta kahor inta aan lagu dhaqaaqin.
- Qurxiyaan qabriga.

## QARAABADA AMA BAROORDIIQAYAASHA KALE EE U DHOW MAYDKA MA AHAN IN AY SAMEEYAAN WAXYAABAHA SOO SOCDA:

- In ay danabaska guriga ku haystaan.
- In ay qaybsadaan danbaska. Guddiga maamulka ismaamulka ayaa fasax ku bixin kara in danbaska la qaybsado haddii xaalado aad u gaar ah ay jiraan.)
- In ay qabri ka qodaan qabuuraha dadweynaha.
- In aas la sameeyo ama danbaska la firdhiyo ayada oo aan caddayn laga haysan Hay`adda Canshuuraha Iswiidhan in sidaa la sameeyo.
- In aas la sameeyo ayada oo aan fasax laga haysan qofka haysta xaquuqda duugta.
- In lagu aaso ama lagu firdhiyo danbaska *minneslund* (beerta xasuusta).
- Ku aasidda ama ku firdhinta danbaska goob aan qabuuro ahayn ayaka oo aan fasax ka haysan Guddiga maamulka ismaamulka
- In ay raraan qaf dhintay ama danbas. (Maamulka duugta ee meesha maydka/danbaska lagu duugay ayaa fasax ku bixin kara in laga saaro haddii xaalado aad u gaar ah ay jiraan.)

## A–Z Qoraalka iyo tixraacyada bogga

**DANBASKA – ASKA** haraadiga marka maydka la gubo, ku gubidda maydka naxashkiisa ama naxashkeeda. Danbaska waxaa lagu duugi karaa noocyo badan oo qabuuro ah:*urngravplats* qabriga danbaska), *askgravplats* (qabriga haraadiga maydka la gubay) ama *askgravlund* (nooc beerta xasuusta ah) ama *kolumbarium/urnmur* (qolka danbaska oo gudaha/dibadda ah), waxaa lagu duugi karaa ama lagu firdhin karaa *minneslund* (nooc ah beerta xasuusta), ama marka fasax laga helo *länsstyrelse kaddib* (guddiga maamulka ismaamulka) danbaska waxaa lagu dul firdhin karaa dhulka ama biyaha.

**ASKGRAVLUND – WAA NOOC AH BEERTA XASUUSTA** waana goob aaska danbaska loogu tala galay si wadar ah waxayna la mid tahay beerta xasuuta. Waxay leedahay meel si wadar ah loogu tala galay magacyada iyo qurxinta maydka. Qaraabadu waxa ay tagi karaan marka danbaska la duugo. Isticmaalka qabriga ee *askgravlund had iyo jeer waa la fasaxaa ayada oo aan la haysan xaquuqda duugta. Fahamkaan si isku mid ah kagama tarjumayo meel kasta waxaan khusayn kara kala duwanaansho gudaha ah.* *Eeg bogga 17aad.*

**ASKGRAVPLATS – QABRIGA HARAADIGA MAYDKA** la gubay waa qabri loogu tala galay danbaska/weelka danbaska. Waxaa macquul ah in xaaska/saaxiibka/qaraabada la isla galiyo xabaasha qabriga haraadiga maydka la gubay. Xaquuqo kooban oo duugta ah ayaa khuseeya qabriga noocaan ah. Xaddidaaddu waxa ay khusaysaa muuqaalka iyo sida ay noqonayso xasuusta qabrigu iyo waxyaabaha kale ee qurxinta iyo diyaarinta qabriga. Fahamkaa a*skgravplats kagama tarjumayo meel kasta waxaana khusayn kara kala duwanaansho gudaha ah.* *Eeg bogga 16aad.*

**BEGRAVNINGSAVGIFT – KHARASHKA DUUGTA** *ka Eeg bogga 6aad.*

**BEGRAVNINGSCEREMONI – XAFLADDA DUUGTA** *Eeg bogga 11aad.*

**BEGRAVNINGSHUVUDMAN – MAAMULKA DUUGTA EEG** *Huvudman*

**BEGRAVNINGSOMBUD – WAKIILKA DUUGTA** *Eeg bogga 21aad.*

**BEGRAVNINGSPLATSER –** kuwa dadweynaha iyo kuwa gaarka ah ba, waa qabuuraha – si kale haddii loo dhigo waa goobaha loogu tala galay in lagu aaso maydadka ama danbaska dadka dhinta. Farqiga u dhexeeya qabuuraha dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay waa in kuwa dadweynaha ay sameeyeen maamulka kanisadda ama dowladda hoose, ayadoo kuwa gaarka loo leeyahayna ay sameeyeen mu`asasooyin iyo bulshada diintaas haysata ee kale. Dhammmaan dadka ka diiwaan gashan diiwaanka dadweynaha ee deegaan maamuleedka maamulka duugta waxa ay xaq uleeyihiin in lagu duugo ama danbaskooda lagu firdhiyo qabuuraha dadweynaha. Xaquuqdaano ma khusayso qabuuraha gaarka loo leeyahay. Erey bixinada goobta wax lagu aaso iyo qabuuraha waxaa had iyo jeer loo isticmaalaa si isku micno ah.

**BISÄTTNING** waxaa lagu qeexi karaa qaabab kala duwan. Micniheedu waa uu ku kala duwanaan karaa meelaha kala duwan, laakiin waxa ay soo koobaysaa dhammaan waxyaabaha la xiriira galinta maydka naxashka iyo gayntiisa xafladda duugta, aaska ama gubidda. Waxyaabaha soo socda ayaa kamid noqon kara *bisättning*: dhar u xiridda maydka, galinta maydka naxashka, qaadidda naxashka iyo la wareegidda maydka kujira naxashka ee dhismayaasha si loo kaydiyo iyo si loosoo arko.

Dhismayaashaas oo kale waqtiyada qaar waxaa loo yaqaan macbadka qabriga Ingiriis ahaan.

**BORGERLIG BEGRAVNING – DUUGTA DADWEYNAHA** Tan micnaheedu waa in xafladda sagoontinta aysan raacayn qaabka adeegga laga isticmaalo Kaniisadda Iswiidhan sidookalena aan raacayn qaabkaadeegga laga isticmaalo bulshooyinka diimaha kale. *Eeg bogga 13aad.*

**BORGERLIG BEGRAVNINGSFÖRRÄTTARE – HOGAAMIYAHA MADAXA DUUGTA.** Waxaa bixiya qaar kamid ah dowladaha hoose iyo agaasimeyaasha duugaha. Qaraabada ama saaxiibada maydka ayaa sidoo kale noqon kara madaxa duugta dadweynaha; wax fasax ah looma baahna. *Eeg bogga 13aad.*

**BÅRTÄCKE – PALL AMA MORTCLOTH.** Tani waa maro lagu duubo naxashka. Waxay had iyo jeer daboosha naxashka oo dhan, laakiin qaar kamid ah maryaha/dharka naxashku waa kuwo yaryar. Waxaa taa badakkeeda loo isticmaalaa qurxinta naxashka. Maamulka kaniisadda ayaa bixin kara marada, laakiin qaraabada maydka waxa ay isticmaali karaan maryahooda.

**BÄRARE –NAXASH QAADEYAAL AMA DADKA NAXASHKA QAADA** waxaa looga baahan yahay in ay maydka qaadaan inta lagu jiro xafladda duugta. Haddii adeegga duugta lagu soo gaba gabeeyo meel banaanka ka ah qabuuraha, qaadidda naxashka ayada oo loo galbinayo qabriga ayaa kamid ah adeegga waxaana laga bixinayaa kharashka kaniisadda, sidaa darteed waa mid bilaash u ah xubnaha Kaniisadda Iswiidhan. Xaaladaha kale, hantida maydka ayaa laga bixiyaa kharashka. *Eeg bogga 12aad.*

**DÖDSANNONS – OGAYSIISYADA DHIMASHADA** ee la shaacinayo waa khiyaari. Qaraabada ayaa go`aansanaya baaxadda iyo muuqaalka ogaysiiska. Waxaa jirta xorriyad badan oo loo dooran karo calaamadda shakhsiga, laakiin waxaa jira xaddidaado gaar ah. Rabitaanadaada kala hadal agaasinka duugta.

**DÖDSBO - HANTIDA MAYDKU WAA QODOB SHARCI AH.** Hantidu waxa ay ka kooban tahay hantida iyo daynta maydka. Kharshka duugta, gubidda maydka iyo/ama aaska lagama daboolayo kharashka duugta ee laga bixinayo hantida maydka. Haddii hantidu aysan lacag lahayn, dowladda hoose ayaa kaalmo dhaqaale siinaysa.

**FAMILJEGRAV – QABRIGA QOYSKA** ma ahan qodob sharci ah laakiin waxaa inta badan loo isticmaalaa qabri horay u jiray kaasoo dhowr qof oo xubnaha qoyska kamid ah horey loogu aasay.

**FLYTTNING AV KISTA ELLER URNA – KA QAADIDDA NAXASHKA AMA WEELKA DANBASKA** qabri ayadoo la gaynayo mid kale lama ogola haddii aysan jirin sababo khaas ah marka ya duugtu dhacdo. Maamulka duugta ee goobta naxashka ama weelka danbaska lagu duugay ayaa qiimaynaya codsiyada qaaditaanka haraadiga maydka. Haddii maamulku diido codsiga, racfaan ayaa loo gudbin karaa guddiga maamulka ismaamulka (*länsstyrelse*).

**GRAVRÄTT –XAQUUQDA DUUGTA** waa xaquuqda isticmaalidda qabri khaas ah. Qabuuraha qaar ayaa leh xaquuq duugitaan, qaar waxay leeyihiin xaquuqo kooban oo duugitaan qaarkoodna malahan xaquuq duugitaan; sidoo kale eeg *Damaanad qaadeyaasha*. Xaquuqaha duugtu waxa ay la yimaadaan xaquuqaha iyo waajibaadka labadaba. *Eeg bogga 14aad.*

**GRAVSKÖTSEL** waxay la micno tahay ilaalinta qabriga. Qofka haysta xaquuqda duugta ee qabuuraha leh xaquuqahaas oo kale – *kistgravplats* (qabriga naxashka) iyo *urngravplats* (qabriga danbaska) – waa in ay qabriga ka dhigaan mid nadiif ah kuna jira xaalad

wanaagsan. Dadka xaquuqda u haysta duugta ayaga ayaa iskood u ilaalsan kara qabuuraha ama waxay gadan karaan adeegga, tusaale waxay ka gadan karaan maamulka kaniisadda. *Eeg bogga 17aad.*

**GRAVSTEN – DHAGAXA QABRIGA.** Dhagaxaas oo kale ama xasuusaha kale waa qabuuro khiyaari ah. Maamulka duugtu waa in ay soo ogolaadaan dhagaxa qabriga lasoo gudbiyo ama xasuusaha kale kahor inta aan la taagin ama aan la rakibin. Haddii maamulku diido codsiga, racfaan ayaa loo gudbin karaa guddiga maamulka ismaamulka (*länsstyrelse*). Xasuus kale oo ku saabsan qabriga naxashka ama qabriga danbaska – kuwaasoo ah, qabuuro haysta xaquuq aasitaan – waxaa iska leh qofka xaquuqda u haysta duugta, kaasoo mas`ull ka ah xaqiijinta in si amaan ah loo taago ama loo rakibo.

**GRAVSÄTTNING – DUUGIDDA MAYDKA AMA DUUGIDDA/FIRDHINTA DANBASKA** waa in ay u dhacdaa sida ugu dhaqsaha badan waana in aysan ka danbayn hal bil dhimashada kaddib. Aaska/firdhinta danbaska waa in ay u dhacdaa sida ugu dhaqsaha badan waana in aysan ka danbayn hal sano gubidda maydka kaddib. *Eeg bogga 19aad.*

**GRIFTEFRID/GRAVFRID –KARAAMADA QABRIGA.** Ereyadaanu kuma jiraan Sharciga Duugta laakiin waa shaqada diyaar garowga sharciga. Mabda`a aasaasiga ah ee in karaamada qabrigu ay tahay in la xushmeeyo waxaa lagu muujiyaa diiditaanka khuseeya u ogolaanshaha in maydka ama danbaska qofka dhintay la qaado. Xeerka Ciqaabta Iswiidhan waxaa uu sheegayaa waxa ka dhalan kara ku xad gudbidda karaamada qabriga iyo ciqaabta ka dhalan karta haddii sidaa la sameeyo.

**HUVUDMAN – MARKA LA EEGO MOWDUUCAAN TANI WAA MAAMULKA DUUGTA.** Maamulku waxay mas`uul ka yihiin duugta, gubidda iyo shaqada aaska goob dhul cayiman ah. *Eeg bogga 4aad.*

**KISTA – NAXASHKA** kaasoo loo isticmaalo labadaba aaska iyo gubidda maydka. *Eeg bogga 10aad.*

**KOLUMBARIUM – COLUMBARIUM** waxa uu ka yimid ereyga laatiinka ah ee *columba*, kaasoo micnihiisu yahay qooley, sababtoo ah qaab ahaan waxa uu u egyahay guryaha qooleyda lagu xanaaneeyo kuwaas oo ay qooleydu ku nooshahay. Erayga columbarium waxaa loo isticmaalaa magaca darbiga xabaasha kaasoo leh qoldhobyo yaryar oo loogu tala galay weelasha danbaska iyo danbaska. Xaquuqo kooban oo duugta ah ayaa khuseeya columbarium-ka. *Eeg bogga 17aad.*

**KREMERING – GUBIDDA**waxa uu ka yimid *cremare* laatiin ahaan micnaheedu yahay in wax la gubo. Gubiddu waa in ay dhacdaa waqti aan ka danbayn hal bil dhimashada kaddib. *Eeg bogga 18aad.*

**KYRKOAVGIFT – KHARASHKA KANIISADDA** waxaa bixinaya xubnaha Kaniisadda Iswiidhan. Kharashkaan waxaa kujira adeega baadariga (wasiir Lutheran), duugta ka dhacaya kaniisadda leh baadariga (wasiir Lutheran), muusikaystaha kaniisadda/mulaxamka, naxash hayeyaalka iyo adeegga qaabilaha.
*Eeg bogga 11aad.*

**LOKAL FÖR FÖRVARING OCH VISNING – ISTICMAALKA DHISMAYAASHA LOOGU TALA GALAY KAYDINTA IYO ARAGTIDA** waxay kujiraan kharashka duugta. Maydadku waxay ku jirayaan naxashyadooda kahor xafladda duugta hadii xafladdaas oo kale ay dhacayso. Aagga dhismayaasha maydka lagu kaydiyo, waa in qol diyaar u ahaadaa aragtida maydka haddii arinkaan ay qaraabadu codsadaan.

**MINNESLUND – BEERTA XASUUSTA.** Tani waa goob loogu tala galay duugta in si wadar ah loo isticmaalo, ayada oo aan la haysan xaquuqda duugta, taasoo danbaska lagu duugo ama lagu firdhiyo. Meesha aasku waa mi aan la aqoon, sidaa darteed qaraabadu ma xaadirinkaraan aaska ama firdhinta danbaska. Magacyada dadka danbaskooda lagu aaso ama lagu firdhiyo beerta lama muujiyo, laakiin waxaa jira meel bulshada ka dhexaysa oo loogu tala galay qurxinta halkaasoo ubaxyo lasoo jaray iyo shumacyo/nalalkabirbirqa la dhigan karo. *Eeg bogga 17aad.*

**MINNESSTUND – SOO DHAWEYNTA DUUGTA.** Waxaa qabanqaabiya qaraabada caadiyanna waxaa la qabtaa kaddib dhammaadka xafladda duugta.

**MINNESSAKER I KISTA OCH URNA – MEMENTOS AMA WAXYAABAHA KALE** ee shakhsiga ee naxashka kujira ama weelka danbaska waa la ogolyahay. Si kastaba ha ahaatee, waxyaabaha waxyeellaynaya deegaanka, dhismayaasha ama qalabka, ama waxyeelaynaya dadka shaqada kahaya naxashka, lama ogola. Shayga dahabka ah waxaa lagu dari karaa danbaska kujira weelka danbaska kahor inta aan daboolka la xirin. Shaqaalaha meesha maydka lagu gubo waa in waqti badan lal xiriiro si hormaris ah si ay u sharaxaan sida arintaan loo samayn karo.

**PROCESSIONSBÄRNING,** *Eeg Bärare – naxash qaade ama dadka naxashka qaada.*

**STOFT** waa eray luuqadda Iswiidhan ah oo loogu tala galay maydka qofka dhintay. Maydka qofka dhintay waxaa lagu duugi karaa naxash ama waa la gubi karaa.

**SVEPNING** waxay noqon kartaa micno ahaan labadaba ashyaada maydku ku labisan yahay iyo diyaarinta maydka kahor inta aan naxashka la galin.

**SVEPDRÄKT** waa eray loo isticmaalo dharka ama daaha maydka looxiro marka naxashka kujiro. Qaraabada ayaa go`aan sanaysa dharka iyo daaha iyo diyaarinta iyo u labisidda maydka. Ashyaada dabiiciga ah ayaa lagu talinayaa.

**SÄRSKILDA GRAVPLATSER – QABUURAHA KHAASKA AH –** waa in la siiyaa dadka dhinta ee aan xubinta ka ahayn bulshada caqiidada Kiristaanka. Tusaale waxaa u ah qabuuraha Muslimiinta iyo Yuhuudda.

**TRANSPORTKOSTNADER – KHARASHAADKA QAADIDDA** waxaa loola jeedaa laba nooc: kuwa laga rabo in laga bixiyo hantida qofka dhintay iyo kuwo laga bixinayo kharashka duugta. Hantida qofka dhintay waxaa laga bixinayaa qaadidda naxashka uu kujiro qofka dhintay ee laga qaadayo isbitaalka, goobta caafimaadka ama guri gaar ah loona qaadayo dhismayaasha ay maamulka duugtu kula wareegayaan mas`uuliyadda maydka. Dhismayaashaan waxa ay ku dhex ooli karaan kaniisad, macbad, hool xafladeed ama meel maydka lagu gubo. Ka qaadidda naxashka ee dhismayaasha kaydinta ilaa aaska/firdhinta danbaska uu ka dhacayo kaasoo ka dhacaya deegaan maamuleed maamulka duugta ah ayaa lagu darayaa kharashka duugta. Kharshka u qaadista qabri gaar ah ama meesha maydka lagu gubo waxaa daboolaya kharashka duugta xataa haddii uu ku yaallo goob dhuleedka maamulka aaska. *Eeg bogga 7aad.*

**UPPLÅTARE – DAMAANAD QAADAHA** waxa uu damaanad qaadayaa xaquuqda aaska ee qabriga. Damaanad qaadahu caadiyan waa maamulka aaska, laakiin waxay sidoo kale noqon karaan maamulka kaniiisadda ee maamula qabuuraha dadweynaha ayaka oo aan ahayn maamulka aaska.

**URNMUR – COLUMBARIUM-KA BANAANKA** *Eeg bogga 17aad.*

Buugaan macluumaadka *ee ku saabsan duugaha, gubidda maydka iyo xabaalaha* waxaa loo diyaariyay qof walba oo qaba su`aalo ku saabsan sida ay u dhacaan duugaha, gubidda maydka iyo xabaalaha gudaha Iswiidhan. Buugga macluumaadku waxa uu sharaxayaa waxyaabaha howlahaasu ay ka kooban yihiin iyo waxyaabaha kamidka ah kharashaadka duugta.

Waxaa jira qayb gaar ah oo ciwaan looga dhigay *Mina önskemål* (waxyaabaha aan jeclahay) oo kujira bartamaha buugga. Halkaas waxaad ku buuxin kartaa tafaasiisha waxayaabaha ada jeclaan lahayd in duugtaada ay kujiraan – si aad u caawiso qaraabadaada.

## Su`aalaha ku saabsan duugaha, gubidda maydka iyo xabaalaha?

markaugu horeysa, la xiriir maamulka aaska ee goobta ee arintu khusayso.

Tafaasiisha xariirka waxaa laga heli karaa

**www.svenskakyrkan.se/kontakt** (baarista maamulka kaniisadda) arimaha kajira goobaha halkaasoo maamulka kaniisadda Iswiidhan iyo kooxaha maamulada kaniisadaha ay ka yihiin maamulada duugta. Macluumaadka guud ee khuseeya duugta, aaska iyo shaqada gubidda maydka iyo adeegga duugta ayaa sidoo kale halkaa lagu bixiyaa.

**www.stockholm.se** (guji stöd & familj/begravning & kyrkogårdar) si aad u hesho waxyaabaha kajira Magaalada Stockholm.

**www.tranas.se** (guji familj & omsorg/begravning & griftegårdar) si aad u hesho arimaha kajira dowladda hoose ee Tranås.

Ururka Shaqaalaysiiyaha Kaniisadda Iswiidhan waa shaqaalaysiiye iyo urur adeeg oo uu leeyahay maamulka kaniisaddu, kooxaha maamula kaniisadda iyo baadariyada magaalada. Ururku waxa uu siinayaa talo iyo taageero khusaysa shaqada duugta gubidda maydka iyo aaska maamulada kaniisadda iyo kooxaha maamulada kaniisadda ee ah maamulka duugta.

Svenska kyrkans arbetsgivarorganisation

buuxi, saar kaydina

KU SOCOTA QOFKA
QABANQAABINAYA DUUGTAYDA

# Waxa aan jeclahay

# Ku socota qofka qabanqaabinaya duugtayda – Rabitaanadayda

Magaca ........................................................................................................................................

Lambarka aqoonsiga shakhsiga ............................................................................................ .

Meesha iyo taariikhda ...................................................................................................................

Saxeexa ........................................................................................................................................

Waxaan usheegay qofkaan/dadkaan waxyaabaha aan jeclahay .......................................................

Waxaan jeclaan lahaa in qofka soo socdaa uu qabanqaabiyo duugtayda, tusaale ahaan asaga oo la xiriiraya agaasime duugta (guri duugta lagu dhigo), maamulka aaska (maamulka kaniisadda/kooxda maamulka kaniisadda/dowladda hoose) iyo madaxa duugta ama maamulaha.

.............................................................................................................................................................

Cinwaanka .................................................................................................................................

Tafaasiisha xiriirka ee kale ...................................................................................................

## Waxaan jeclaan lahaa in la igu duugo naxash

- [ ] qabri cusub oo ku yaala qabuuraha ..........................................................................................

.................................................................................................................................................

- [ ] Waxaan jeclaan lahaa in la igu aaso qabri horey u jiray oo leh lambar qabri ............................................ kuna yaalla qabuuraha dhexdooda .................................................................................................. gudaha ..............................................................................................................................

- [ ] Waxaan ahay qofka haysta xaquuqda duugta ee qabriga.

- [ ] Xaquuqda duugta ee qabriga waxaa haysta qof kale/dad kale, kuwaas oo ay waajib tahay in dhammaantood ay fasax bixiyaan.

  Magaca(magacyada) qofka(dadka) haysta xaquuqda aaska, ciwaankiisa(kooda) iyo tafaasiisha xiriir ee kale:

  .................................................................................................................................................

  .................................................................................................................................................

  .................................................................................................................................................

  .................................................................................................................................................

  .................................................................................................................................................

- [ ] Haddii aan meel uga banaanayn naxashkayga qabriga – kaliya weelka danbaska ama danbaska – taa badalkeeda waxaan jeclaan lahaa in la i gubo danbaskaygana halkaas lagu aaso.

- [ ] Haddii ku aasidda qabrigii horey ujiray aysan suurto gal ahayn, waxaan jeclaan lahaa in la igu aaso qabri cusub oo qabuuraha ku yaalla .......................................................................................................... gudaha ..............................................................................................................................

## Waxaan jeclaan lahaa in la igu gubo

danbaskayga lagu aaso qabuuraha ……………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………………………………..

Waxaan jeclaan lahaa in xabaashayda ugu danbaysaa ay noqoto

- ☐ qabriga danbaska oo cusub *(urngrav)* ☐ qabriga haraadiga maydka la gubay oo cusub *(askgravplats)*
- ☐ qoldhob cusub oo ku dhexyaalla columbarium banaanka ah *(urnmur)*
- ☐ columbarium cusub oo gudaha ah *(kolumbarium)*
- ☐ *askgravlund* – waa goob aaska danbaska loogu tala galay si wadar ah waxayna la mid tahay beerta xasuuta. Waxay leedahay meel si wadar ah loogu tala galay magacyada iyo qurxinta maydka)
- ☐ *minneslund* (beerta xasuusta. Tani waa goob loogu tala galay duugta in si wadar ah loo isticmaalo, ayada oo aan la haysan xaquuqda duugta, taasoo danbaska lagu duugo ama lagu firdhiyo)

☐ Waxaan jeclaan lahaa in danbaskayga lagu aaso qabri horey u jiray kaasoo leh lambar qabri ……………… (qabriga naxash/qabriga weelka danbaska/ qabriga haraadiga maydka la gubay/columbarium gudaha ah ama dibadda) kaasoo ku yaalla qabuuraha dhexdooda ………………………………………………………… gudaha ……………………………………………………………………………………………………………..

☐ Waxaan ahay qofka haysta xaquuqda duugta ee qabriga.

☐ Xaquuqda duugta ee qabriga waxaa haysta qof kale/dad kale, kuwaas oo ay waajib tahay in dhammaantood ay fasax bixiyaan.

Magaca(magacyada) qofka(dadka) haysta xaquuqda aaska, ciwaankiisa(kooda) iyo tafaasiisha xiriir ee kale:

……………………………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………………………

Haddii ku aasidda qabrigii horey ujiray aysan suurto gal ahayn, waxaan jeclaan lahaa in la igu aaso qabri cusub oo qabuuraha ku dhex yaalla ..............................................................................................

gudaha ..............................................................................................

Waxaan jeclaan lahaa in danbaskayga biyo lagu dul firdhiyo ..............................................................................................

..............................................................................................

Waxaan jeclaan lahaa in danbaskayga dhulka lagu dul firdhiyo ..............................................................................................

..............................................................................................

Haddii firdhinta danbaska aan laga ogolayn goobta aan doortay, waxaan jeclaan lahaa in xabaashaydu ay noqoto sida soo socota: ..............................................................................................

## Naxashka

- [ ] Waxaan jeclaan lahaa nooca ugu fudud ee naxash ah.

- [ ] Waxaan jeclaan lahaa in naxashku u ekaado sidaan (shayga, midabka, iyo wixii lamid ah):

..............................................................................................

..............................................................................................

- [ ] Waxaan jeclaan lahaa in qaraabadaydu ay doortaan naxashka.

- [ ] Waxaan haystaa naxash aan samaystay oo aan jeclaan lahaa in aan isticmaalo.

Wuxuu ku kaydsan yahay: ..............................................................................................

..............................................................................................

Haddii aysan macquul ahayn isticmaalka naxashka aan samaystay, waxaan jeclaan lahaa in naxashka la ii dooray uu sidaan noqdo: ..............................................................................................

..............................................................................................

## Diyaarinta/u labisidda maydka kahor inta aan naxashka la galin

*Ashyaada dabiiciga ah ayaa lagu talinayaa.*

- ☐ Waxaan jeclaan lahaa in naxashka la ila galiyo go`ayga, barkin iyo kubeerto/buste/suuf.

Waxaan jeclaan lahaa in aan xirto maryahayga: ..............................................................................................

....................................................................................................................................................................

....................................................................................................................................................................

- ☐ Waxaan jeclaan lahaa in qaraabadaydu ay ii dooraan daah ama dharka.
- ☐ Waxaan jeclaan lahaa alaabta kujirta naxashka in la isticmaalo.
- ☐ Ma *doonayo* in qaraabadaydu ka qaybqaataan u labisidda iyo diyaarinta maydkayga si la ii dhigo naxashka.

WAXYAABAHA KALE EE AAN JECLAHAY EE KU SAABSAN NAXASHKA IYO DIYAARINTA/U LABISIDDA MAYDKAYGA

....................................................................................................................................................................

....................................................................................................................................................................

....................................................................................................................................................................

....................................................................................................................................................................

## Weelka danbaska

*Wax weel ah looma baahna haddii danbaska loogu firdhinayo si toos ah qabriga, gudaha beerta xasuusta loo yaqaan minneslund, biyo dushood ama dhulka dushiisa. Xaaladahaas oo kale, danbaska waxaa lagu qaadayaa boorso khaas ah ama santuukh alwaax ah oo xiran ayadoo laga qaadayo meesha maydka lagu gubay.*

☐ Ma jeclaan lahayn in aan weelka danbaska lahaado.

☐ Waxaan jeclaan lahaa in weelka danbasku u ekaado sidaan (shayga, midabka, iyo wixii lamid ah):

..........................................................................................................................................

..........................................................................................................................................

..........................................................................................................................................

☐ Waxaan jeclaan lahaa in qaraabadaydu ay doortaan weelka danbaska.

☐ Waxaan haystaa weel danbas oo aan samaystay oo aan jeclaan lahaa in aan isticmaalo.

Wuxuu ku kaydsan yahay: ..............................................................................................................

..........................................................................................................................................

Haddii aysan macquul ahayn isticmaalka weelka danbaska aan samaystay, waxaan jeclaan lahaa in weelka danbaska la ii dooray uu sidaan noqdo: ..........................................................................................

..........................................................................................................................................

WAXYAABAHA KALE EE AAN JECLAAN LAHAA EE KHUSEEYA WEELKA DANBASKA

..........................................................................................................................................

..........................................................................................................................................

..........................................................................................................................................

..........................................................................................................................................

## Xafladda duugta

*Xafladda duugtu waa arin khaas ah waxaana loo qaabayn karaa sida aad jeceshahay*

*– ama waa la iska dayn karaa.*

- [ ] Waxaan xubin ka ahay Kaniisadda Iswiidhan waxaana jeclaan lahaa in xafladda duugta loo qabto si waafaqsan qaababka adeegga Kaniisadda Iswiidhan.

Adeegga duugta lagu qabanayo

- [ ] maamulka kaniisaddayda ……………………………………………………………………………………………
- [ ] macbad ………………………………………………………………………………………………………………
- [ ] kaniisadda/macbad ku yaalla meel kale ………………………………………………………………………

- [ ] Waxaan xubin ka ahay bulsh diimeed ………………………………………………………………………

waxaana jeclaan lahaa in xafladda duugtu u dhacdo si waafaqsan qaabka adeegga khuseeya bulsho diimeedkaas

gudaha dhismahooda ……………………………………………………………………………………………………

dhismayaal kale gudahood………………………………………………………………………………………………

- [ ] Waxaan jeclaan lahaa in adeeg duug dadweyne la qabto
  - [ ] goobta aan lahayn calaamado diimeed oo aybixiyaan maamulka duugtu.
  - [ ] dhismayaal kale gudahood ………………………………………………………………………………

- [ ] Ma *jecli* in aan yeeesho xaflad duugeed.

WAXYAABAHA KALE EE AAN JECLAAN LAHAA EE KHUSEEYA XAFLADDA DUUGTA

(qurxinta, marada ama calalka lagu doobo naxashka, muusik, qabayo, iyo wixii lamid ah.)

………………………………………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………………………………………

## Soo dhawaynta duugta/isu imaatanka

*Soo dhaweynta duugtu waa arin khaas ah waxaana loo qaabayn karaa sida aad jeceshahay – ama waa la iska dayn karaa.*

Rabitaanada gaarka ah (martida, goobta, caajis bixinta, madadaalooyinka, iyo wixii lamid ah)

……………………………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………………………

- [ ] Waxaan jeclaan lahaa in qaraabadayda iyo saaxibaday go`aan sadaan sida loo qabanayo soo dhawaynta duugta.
- [ ] Ma *doonayo* in soo dhaweyn duug la qabto.

## Xasuusta qabriga (dhagaxa qabriga waa isku mid)

Rabitaanada gaarka ah (dhagaxa qabriga, dhir beerista, iyo wixii lamid ah)

……………………………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………………………………

- [ ] Waxaan jeclaan lahaa in qofka qabanqaabinaya duugtayda uu doorto xasuusta qabriga.

- [ ] Ma *doonayo* xasuus qabri oo magacaygu ku dul qoran yahay.

## Qoraalada

Qoraalada ku saabsan magacyada muhiimka ah, ciwaanada, tafaasiisha xiriirka ee kale, websayt yada, shirkadaha caymiska iyo shirkadaha kale, iyo wixii lamid ah ee muhiimadda u leh qofka qabanqaabinaya duugta. Wax kasta oo ah go`aan ku saabsan ku deeqidda xubnaha iyo nudeyaasha jirka sidoo kale halkaan ayaa lagu qori karaa.

Si looga fogaado khilaafka ka dhex dhasha qaraabada waxaa muhiim ah in aad qorto rabitaanadaada ku saabsan duugtaada iyo in aad ogaysiiso hal ama wax ka badan oo ah dadka kugu dhow. Buuxinta tafaasiisha buuggaan macluumaadka waa qaab rabitaanadaada lagu ogaanayo.

Su`aalaha ku saabsan duugaha, gubidda maydka iyo xabaalaha?

Marka ugu horeysa, la xiriir maamulka aaska ee goobta ee arintu khusayso.

Tafaasiisha xariirka waxaa laga heli karaa
**www.svenskakyrkan.se/kontakt** (baarista maamulka kaniisadda)
arimaha kajira goobaha halkaasoo maamulka kaniisadda Iswiidhan iyo kooxaha maamulada kaniisadaha ay ka yihiin maamulada duugta.
**www.stockholm.se** (guji stöd & omsorg, kaddib begravning & kyrkogårdar)
waxyaabaha khuseeya waxyaabaha kajira Magaalada Stockholm.
**www.tranas.se** (guji familj & omsorg, kaddib begravning & griftegårdar)
waxyaabaha khuseeya waxyaabaha kajira dowladda hoose ee Tranås.

Svenska kyrkans arbetsgivarorganisation